La shaqaynta ismaamul hoosaadka Hamilton ee u adeegida caruurta.

Hagaha qoyska.

Nidaamka Adeegyada Carruurta ee ismaamul hoosaadka Hamilton wuxuu u baahan yahay in kiis hayahaagu ku siiyo buugyarahan kulanka ugu horreeya. Akhriska buug yarahan waxuu kaa caawin doonaa inaad fahanto waxa laga filayo intaan ku hawlanahay arimaha qoyskaaga.

Haddii aad wax su'aalo ah qabtid, wac Kiis hayahaaga ama kormeeraha hoos ku xusan

Magaca Kiis hayahaaga.:	Teloofonka:
Magaca Kormeeraha:	Teloofonka:

- Adeegyada Carruurta ee Ismaamul hoosaadka Hamilton waxay heegan uyihiin inay caruurta ka ilaaliyaan xad gudubka,Dayaca iyo xadgudub, dayac, iyo ku tiirsanaanta marka qoysaskoodu awoodin ama oo aan rabin inay taageeraan.
- Waxaa naga go'an ilaalinta iyo xoojinta qoysaska iyo ixtiraamka sharaftooda.
- Waxaan ku dadaalnaa inaan gaarno yoolalka badbaadada, jiritaanka iyo fayo qabka carruurta annagoo u doodayna xuquuqdooda iyo bixinta adeegyo waxtar u leh carruurta iyo qoysaska anagoon wax faragalin ah ku samaynayn sida sharcigu qabo.

Xafiiska Guud :

222 East Central Parkway,
Cincinnati, OH 45202

(513) 946-1000

Websaydhka: www.hcjfs.org

Kusaabsan adeegyada caruurta ee ismaamul hoosaadka Hamilton.

Xafiiska u adeegida caruurta ee ismaamul hoosaaadka Hamilton waa qayb ka mid ah Waaxda Shaqada iyo Adeegyada Qoyska ee Ismaamulka Hamilton. Sharciga Ohio wuxuu farayaa in waaxda u adeegida caruurta in ay oo ay diiwaangeliyaan dhammaan warbixinnada ku saabsan iyo tacadiga ka dhanka ah caruurta isla markaana ilaaliyaan xuquuqdacarruurta lagu xadgudbay, la dayacay, ama kuwa ku tiirsan ee u baahan badbaadin.

Waaxda u adeegista Carruurta waxay rumeysan yihiin inay ufiican tahay carruurta inay ku noolaadaan Bay,a qoys. Waxaan ku dadaalnaa inaan ka caawinno qoysaska inay wada joogaan inta ay xallinayaan Khilaafaadkooda. Laakiin marka waalidku uusan rabin ama uusan awoodin inay ilaaliyo xuquuqda carruurtooda, Waaxda u adeegida Carruurta waxay soosaaraan qorshe lagu ilaalinayo Badqabka caruurta Tani waxay noqon kartaa qorshe guri iyo mid ka baxsan qorshooyinka guriga.

Helintaankawarbixinada ku saabsan xad gudubka(241-KIDS)

241-KIDS waa Qad taleefoon 24 saac shaqeeya kaasoo ee loogu talagalay soo gudbinta xadgudubka ama dayacaadda carruurta da'doodu ka yar tahay 18 (ama 21 jir ah haddii jir ahaan, maskax ahaan ama horumar ahaan dhiman). Qof kasta, oo ay ku jiraan xirfadlayaasha (sida macallimiinta iyo dhakhaatiirta), waxay wici karaan 241-KIDS markay haystaan sabab ay ku rumaystaan in ilmo lagu xadgudbay ama la dayacay. Carruurtu waxay sidoo kale soo wacikaraan si ay u soo sheegaan xadgudub ama dayacaad qaraabo, saaxiib, ama iyaga naftooda.

Maxaan kafilan karaa markay waaxda u adeegida caruurta igu soo booqdaan gurigeyga?

Sharciga Ohio wuxuu farayaa waaxda u adeegista caruurta inay dhammaystiraan qiimeynta warbixinada ku saabsan badqabka caruurta 241-KIDS eelaga yaabo in lagu xadgudbay ama la dayacay.

Sida uu qabo sharciga Ohio:

Ku xadgudubka caruurta waa:

- Khatar gelinta ilmaha.
- Dhaawac aan ku talagal ahayn oo lagulakaco ilmaha.
- Fal galmo ah ama xiriir u dhexeeya qof weyn iyo ilmo.
- Dhaawac jireed, ama maskaxeed oo wax u dhimaya ama qatargalinayau hanjabaya inuu waxyeeleeyo caafimaadka ama daryeelka ilmaha.

Dayaca Caruurtucunuggu waa:

- Cunto yari aan ku filnayn, ho la,aan daryeel la,aan, waxbarasho la,aan ama daryeel

caafimaad oo soowajahda caruurta sababo la xiriira daryeel waalid la,aan .

Kiishayaha waaxda u adeegida caruurta ee yimaada gurigaaga ka dib markii la soo sheegay warbixin ku saabsan xadgudub ama dayac ayaa waxuu bilaabayaa qiimayn. Kiis hayaha ayaa kuu sheegi doona waxyaabaha la soo sheegay wuxuuna u baahan doonaa inuu baaro warbixinta asagoo la hadlaya adiga, carruurtaada, iyo dugsiga ama xirfadlayaal kale, qaraabada, iyo deriska, haddii loo baahdo oo ay lamahuraan noqoto. Sida uu qabo sharciga Ohio, kuuma sheegi karno cidda na soo wacday.

Qodobbo muhiim ah oo mudan in la xuso:

- Kadib markay dhammeeyaan qiimeynta hore, waaxda u adeeida Carruurtu waa inay gaaraan xukunka kiiiska. xukunkaas waxuu soo gabagabeyn doonaa xadgudubka ama dayacaadda "waa la caddeeyay" i cadayn toos ah oo ku saabsan sixun uladhaqmid), "la muujiyey" (calaamado laakiin aan caddayn toos ah lahayn), ama "aan la xaqiijin" (aan la aan la cadaynkarin)
- Haddii qiimeyntu go'aamiso in carruurtaadu ku badqabaan daryeelkaaga, kiiska kumasii luglahaandoono Taabadalkeed, waanu xireynaa kiiskeena ama waxaan kuu gudbineynaa adeega bulshada kale si aad uhesho taageero.
- Haddii qiimeynta ay go'aamiso in carruurtaadu aysan ammaan ahayn, waaxda u adeegida Carruurta ayaa kula kaashan doona si loo abuuro qorshe caruurtaada lagu badbaadinayo iyadoo dhanka kale qoyskaaga laga caawinayo waxyaabaha lasoosheegay.

Kawaran haddii waaxda u adeegida Carruurtu ay ku sii dhex jiraan arimaha qoyskayga?

waaxda u adeegida Carruurta waxay kiiskaaga u wareejin doonaan kiis hayaha Kiiska ee Socda haddii adeegyo dheeraad ah loo baahdo. kiis hayahan ayaa kula wadaagi doona adiga si aad u horumariso oo u hirgeliso qorshaha kiiska ee qoyskaaga. Qorshuhu wuxuu sharxi doonaa yoolalka, talaabooyinka adeegyada iyo isbeddelada looa baahan yahay si loo badbaadiyo carruurtaada. Waxaa lagaa codsan doonaa inaad saxiixdo qorshaha waxaana lagu siin doonaa nuqul.

Sababta oo ah waxaan ka walwalsanahay maslaxadaada iyo amniga caruurtaada, kiis hayahaaga ee Adeegyada Carruurta ayaa si joogto ah kuu soo booqan doona. Waxaan si wada jir ah uga shaqeyn doonnaa inaan ka hadalno horumarka aad ku tilaabsaneysaan dhinaca la socoshada horshahiina. Waxaa lagaa codsan doonaa inaad kaqeyb gasho dib u eegista horumarkaaga si aad uhesho yoolalka qorshaha kiiska. Waan kula socon doonnaa ilaa aan ka ogaanno inaadan u baahnayn caawimaad si aad ilaaliso badqabka carruurtaada.

Si loo gaaro hiigsigaas, daryeel bixiyeyaal badan ayaa isku raacay inay kaqaybqaataan adeegyada sida la-talintabarida waalidnimada, ama daweynta daroogada. Adeegyadan ayaa caawiyay qoysas badan oo ku nool ismaamul hoosaadka Hamilton. Haddii daryeel-bixiyeyaashu diidaan inay kaqaybqaataan, Adeegyada Carruurta waa inay go'aan ka gaaraan haddii ay raadinayaan xal kale, sida ku lug lahaanshaha Maxkamadda Dhallaanka ee ismaamul hoosaaadkaa Hamilton, ayaa loo baahan yahay si loo ilaaliyo ilmahaaga.

Waxyaabaha muhiimka ah ee ay tahay inaad ogaato.

- Waaxda u adeegida Carruurta waxay baaraysaa warbixinnada xadgudubka iyo dayaca waxayna adeegyo siisaa qoysaska adeegyo si loo yareeyo xad gudubka kadhanka ah caruurta.
- Mararka qaarkood, ku xadgudubka carruurta iyo in ladaryeeli waayo waxay noqon karaan fal dembiyo. Adeegyada Carruurtu waa inay ku soo wargeliyaan booliska fal dambiyada suurtagal ah. Waaxda u adeegida Carruurtu cidna masooxiraan. Booliiska oo kaliya ayaa xiri kara dadka kuna soo oogi kara fal dambi.
- Waaxda u adeegida Carruurtu waxay talo ahaan soojeedin kara in carruurta laga kaxeeyo guriga waxayna kaloo rayi ka dhiibankaraan go'aaminta goorta ay soo noqonayaan. Maxkamadda Carruurta ee ismaamul hoosaadka Hamilton ayaa gaari doonta go’aanka kama danbaysta ah.
- Sharciga Daryeelka Carruurta ee Hindiya (ICWA) waa sharci heerfederaal ah oo nidaamiya sida wakaaladaha daryeelka carruurtu u siiyaan adeegyada carruurta iyo qoysaska Dhaladka Mareykanka ah. Haddii ilmahaagu ka tirsan yahay qabiil, ama uu u qalmi karo xubinnimo, qoyskaaga ayaa xaq u leh in la siiyo adeegyo. Fadlan u sheeg kiis hayahaaga haddii aad rumeysan tahay in ilmahaagu uu xubin ka yahay qabiilka ama uu u qalmi karo inuu mid noqdo. Hay'addu waxay xaqiijin doontaa xubinnimada qabiilka. Qabiilka Hindida iyo qaraabada fog ah waxaa la siin doonaa fursad ay kula shaqeeyaan adiga iyo kiishayahaga

si loo horumariyo, loo hirgeliyo, loona eego qorshaha kiiska.

Adeegyo noocee ah ayaa caawin kara qoyskayga?

Si loo yareeyo welwelka xagga nabadgelyada ee carruurtaada, waaxda Carruurta ayaa laga yaabaa inay ku siiyaan ama kuu diraan adeegyada sida:

- La-talinta caafimaadka maskaxda iyo daaweynta.
- Daaweynta caafimaadka.
- Baaritaanka iyo daaweynta daroogada ama aalkolada.
- Tababbarka xirfadaha waalidnimada.
- Adeegyada waxbarashada.
- Ka caawinta helitaanka guri aad ku noolaato.
- Caawinta degdegga ah ee guriga ayaa lagu xalliyaa dhibaatooyinka qoyska iyo arrimaha kale ee halista ah (ilaalinta qoyska).
- In caruurta lageeyo xarumaha laguxanaaneeyo caruurta si waalidka loosiiyo fasax gaaban(xanaanaynta caruurta)
- Adeegyada horumarinta bulshada ee carruurta.
- Barnaamijyada dhalinyarada dhibaataysan

Maxaan la i weydiin doonaa inaan sameeyo?

Caawimaadda Adeegyada Carruurta, waxaad fursad u heli doontaa inaad ka gudubto dhibaatooyinka sababay inay carruurtaadu ahaadaan kuwo aan badqab lahayn. Adeegyada Carruurtu waxay kaa fili doonaan inaad:

- La shaqeysid kiis hayahaaga si aad u sameyso qorshe lagu yareynayo welwelka nabadgalyo ee carruurtaada.
- Kaqeybgalka barnaamijyada iyo adeegyada kuqoran qorshahaaga.
- Inaad samayso isbeddello kaa caawin doona inaad hubiso guri ammaan ah, nadiif ah, oo koriya carruurtaada iyo cunto, aradbax, iyo daryeel caafimaad oo kugu filan.
- La kulan kiis hayahaaga iyo xirfadlayaasha kale si joogto ah si aad dib ugu eegto horumarkaaga.
- Ka qaybgal dhagaysiga oo raac amarada maxkamadda, haddii kiiskaagu ku lug leeyahay Maxkamadda Carruurta ee ismaamul hoosaadka Hamilton.

Kawaran haddii carruurtaydu ay qasab noqoto inay katagaan guriga?

Xaaladaha aan degdegga ahayn, markay Adeegyada Carruurtu ka fiirsadaan ka saarista cunug guriga, waxaan qabannaa kulan rasmi ah oo loogu yeero Shirka Qoyska. Taageerada qoyska, qaraabada, xirfadlayaasha kale ee ku lug leh kiiskaaga ayaa ka soo qeyb geli kara oo ay weheliyaan Adeegyada Carruurta. Waa inaad kaqeyb gasho kulankaan, sidaa darteed waxaad gacan ka geysan kartaa go'aamada ku saabsan carruurtaada iyo caawimaadda qoyskaagu u baahan yahay.

Maxkamadda Dhallaanka ee ismaamul hoosaadkaHamilton waa inay bixisaa oggolaansho ka hor inta Adeegyada Carruurtu aysan carruurta ka saarin gurigaaga. Kadib, Adeegyada Carruurtu waxay raadinayaan meel ku-meel-gaar ah oo ah meesha ugu yar ee xaddidan ee la heli karo si loo daboolo baahiyaha carruurta. qofkaasi wuxuu noqon karaa saaxiib, qaraabo ama kooriska ama guri kooxeed.

Waxay u badan tahay inaad si joogto ah aad u booqan karto carruurtaada. Haddii walaaca nabadgelyo ee carruurtaada laga takhaluso, carruurtaada waxaa lagu celin doonaa daryeelkaaga. Laakiin haddii kale, meelaynta carruurtaadu waxay noqon kartaa mid joogto ah.

Waa maxay xuquuqda aan leeyahay?

Markaad ku lug yeelatid Adeegyada Carruurta, waxaad xaq u leedahay inaad:

- Lagula dhaqmo si xushmad iyo ixtiraam leh.
- Kiis haye oo dhageysta baahiyahaaga iyo welwelkaaga isla markaana kula shaqeeya. kiis hayahaaga waa inuu u maareeyaa kiiskaaga si daryeel leh, gaar ahaaneed, iyo qaab xirfad ahaaneed.
- Diid inaad la shaqeyso qiimeynta.
- Diid inaad aqbasho adeegyada ay kugula talisay Adeegyada Carruurta si iskood ah.
- Ka qayb qaado diyaarinta qorshaha kiiska. Waxaad sidoo kale heleysaa nuqul ka mid ah qorshaha.
- Jawaab hufan, daacad ah oo ku aadan su'aalahaaga si aad u fahanto sababta go'aannada la

qaadanayo iyo tallaabooyinka laga qaadayo kiiskaaga.

- In Laguu wargaliyo siyaabaha kale ee aad ku heli karto caawimaad haddii Adeegyada Carruurtu aysan caawin karin qoyskaaga.
- Ogeysiis qoraal ah ee dhagaysiyada maxkamada dhalinyarada ee ismaamul hoosaadka Hamilton iyo talaabooyinka ku saabsan kiiskaaga hadii maxkamadu ku lug leedahay.

- Ka qayb qaado oo ku wargeli wixii ku saabsan caafimaadka, waxbarashada, iyo ladnaanta ilmahaaga.
- Waa in laguugo adeego si takoor la'aan iyadoo loo eegayo da'da, jinsiyadda, dhalashada waddanka, diinta, jinsiga, nooca galmada, qaab nololeedka, ama naafonimada jirka, maskaxda, ama koritaanka.
- Sheeg wixii walaac ah ee aad qabtid oo xareyso cabasho.

Sideen ugu caawin karaa Adeegyada Carruurta sida ugu fiican ee aan ugu adeegi karo qoyskayga?

Waxaa jira dhowr qaab oo aad ku caawin karto:

- Bixi macluumaad run ah.
- La shaqee shaqaalaha kiiskaaga iyo kuwa kale ee isku dayaya inay ku caawiyaan.
- U dhaqan si aad u wanaajiso xaaladda qoyskaaga adigoon eegaya maslaxada caruurtaada.
- Kaqeybqaado sameynta qorshaha kiiskaaga.
- Raac qorshaha kiiskaaga kana qaybgal adeegyada.
- Ka qaybgal shirarka ku saabsan kiiskaaga - iyo dhageysiga maxkamadda haddii kiisku maxkamaddu ku lug leedahay.
- Noo sheeg haddii aad dhibaato ku qabtid adeegyadeena si aan si fiican kuugu adeegno.

Kawaran haddii aan dhibaato ku qabo Adeegyada Carruurta?

Cabashada go,aanka maxkamada / Amarka Maxkamada

Marwalba ma aqbalidoontid go'aanadeena ama ficiladeena. Haddii kiiskaaga uu ku lug leeyahay Maxkamadda Carruurta ee ismaamul hoosaadka Hamilton, marwalba ma aqbali doontid ficil ama amar Maxkamadeed. Kuwa soo socda ayaa kaa caawin doona inaad wax ka qabato dhibaatooyinka ama khilaafaadka laga yaabo inaad kaa haysato kiiskaaga.

Haddii aad rabto inaad sameyso cabasho ku saabsan tallaabo Maxkamadeed ama amar Maxkamadeed oo la xiriira kiiskaaga Adeegyada Carruurta, waa inaad la xiriirtaa qareenkaaga ama aad keentaa dhageysiga Maxkamadda ee xigta. Kaliya Garsooraha ama Xaakinka kiiskaaga ayaa leh awooda ugu dambeysa ee uu ku badalayo ficil Maxkamadeed ama amar Maxkamadeed. Tusaalooyinka ficillada ama arrimaha Maxkamadda ayaa ah:

- Booqashada
- Koriska Meelaynta
- Adeegyada qorshaynta dacwadaha

Racfaan ka qaadashada dacwada

Rafcaan ayaa loo soo gudbin karaa shakhsiga ay wakaaladda u aragto inuu yahay dambiile la caddeeyay ama la tilmaamay oo ah xadgudub ama dayacaad caruur ka dib qiimeyn / baaritaan. Kaliya eedaysanaha h Racfaanle) ayaa gudbinkara kara rafcaan qaadashada warbixinta. Haddii aad tahay dembiile eedaysane ah oo aadan ku raacsanayn xaaladda kiiska ee la xiriirta warbixin la caddeeyay oo ku saabsan xadgudub ama dayac, waxaad xaq u leedahay rafcaan. Marka baaritaanka la dhammeeyo, waxaad heli doontaa warqad sharraxaysa sida uu kiiska u shaqeeyo. Haddii aad rabto inaad racfaan ka qaadato xukunka, waa inaad ku codsataa dhageysi 30 maalmood gudahood laga soo bilaabo taariikhda warqadda dambiga lagu soo diray iyadoo la wacayo 513-946-1313 ama warqad loo diro:

Feejignaan: Jadwalka Adeegga Dhageysiga Adeegyada Carruurta
Hamilton County iyo Adeegyada Qoyska
222 East Central Parkway
Cincinnati, OH 45202

Marka la helo codsi dhagaysi, jadwal qorsheeyaha ayaa la xiriiri doona racfaan qaadaha si uu u sameeyo balan si uu kiiskooda ugu soo bandhigo sarkaalka dhagaysiga wuxuuna siin doonaa racfaan qaataha warqad ogaysiin ah taariikhda, waqtiga iyo goobta dhagaysiga. Nuqul ka mid ah Nidaamka Adeegyada Carruurta ee Racfaanada Dacwadaha Diidmada ayaa lagu dari doonaa iyada oo la socota ogeysiiska.

Dhageysiga rafcaanka waxaa loo qorsheeyay laba saacadood waxaana la duubi doonaa cod. Dhammaan dhinacyada markhaati furayaa waa la dhaarin doonaa. Sarkaalka dhagaysigu wuxuu soo gudbin doonaa warbixin qoraal ah ka dib dhagaysiga rafcaanka. Go'aanka sarkaalka dhagaysigu waa xalka ugu dambeeya ee gudaha Adeegyada Carruurta ee ismaamul hoosaadka Hamilton.

Cabashada Ficilka ama Go'aanka kiis hayaha.

Waalidiinta, ilaaliyeyaasha, mas'uuliyiinta sharciga ah, daryeelayaasha korinta caruurta ehelka daryeelayaasha, codsadayaasha ama bixiyeyaasha habeyn lagu noolaado oo kormeer ah oo qaangaar ah, iyo carruurta la falgashay hay'adda bixinta adeegyada waxay xaq u leeyihiin cabasho codeed. ku saabsan isdhexgalkaas.

Haddii aad hayso cabasho la xiriirta ficil ama go'aan uu qaatay kiis hayahaaga waa inaad isku daydaa inaad arrinta kala xalliso kiis hayahaaga marka hore. Tusaalooyinka cabashooyinka noocaas ah waxaa ka mid ah:

- In aan laguula dhaqmin si xushmad iyo ixtiraam leh.
- In aan cod la siin marka la diyaarinayo qorshaha kiiska.
- Aan lagu siinin jawaabo cad oo su'aalahaaga ah si aad u fahanto sababta go'aannada loo gaarey.
- Khilaafka adeegyada ku saabsan qorshaha kiiska.

Maxaa dhacaya haddii taasi shaqayn wayso?

Haddii adiga iyo hawlwadeenka kiiska xallin kariwaydaan dhibaatada, raac talaabooyinkan:

Tallaabada 1: La hadal Kormeeraha.

- Wac 513-241-KIDS (5437) oo weydii magaca iyo lambarka taleefanka kormeeraha shaqaalaha dacwada.
- La xiriir kormeeraha shaqaalaha dacwada. Waad kula hadli kartaa kormeeraha taleefanka ama waxaad weydiisan kartaa kulan.
- Sharax waxyaabaha aad ka welwelsan tahay una sheeg kormeeraha sababta aadan u qanacsanayn.
- Dhageyso oo su’aalo weydii.
- Kormeeraha ayaa ku dhageysan doona oo kula shaqeyn doona si aad u xalliso dhibaatada.
- Waxa kale oo laguu tilmaami karaa Xafiiska Adeegga Macaamiisha ee HCJFS.

- Haddii aadan ku qanacsanayn jawaabta kormeeraha, qaado tallaabada 2-aad.

Tallaabada 2: La hadal ama La kulan madax waaxeed.

- Wac 513-241-KIDS (5437) oo weydii magaca iyo nambarka taleefanka ee madax waaxeedksa. Waxa kale oo aad weydiin kartaa hawlwadeenkaaga ama kormeerahaaga magaca iyo macluumaadka lagala xidhiidhi karo taliye waaxeedkooda.
- La xiriir madax waaxeedka. madax waaxeedka taleefanka ayuu kula soo hadli doonaa ama wuxuu balan ayuu kuu qabandoonaa.
- Taliyaha qaybta ayaa dhageysan doona waxyaabaha aad ka walwalsan tahay wuxuuna ka shaqeyn doonaa xalinta dhibaatada.
- Sidoo kale waxaa laguu gudbin karaa Xafiiska Adeegyada Macaamiisha ee HCJFS.
- Haddii aadan ku qanacsanayn jawaabta taliyaha qaybta, qaad tallaabada 3-aad.

Tallaabada 3: La xiriir Xafiiska Adeegyada Macaamiisha ee Adeegyada Carruurta.

- Wac Xafiiska Adeegga Macaamiisha ee HCJFS (CSO) 513-946-2466 kordhinta 2, farriin ugu soo dir HCJFS.org , adoo adeegsanaya tabka Xiriirka ama e-mayl ugu dir HamiltonCountyCSO@jfs.hamilton-co.org
- CSO(Xafiiska adeega macaamiisha) way dhageysan doonaan walaacyadaada waxayna ka shaqeyn doonaan xalinta dhibaatada.
- CSO waxaa laga yaabaa inay kuu balamiso kulan. Shaqaalaha kiiska, iyo madaxa qaybta ama kormeeraha ayaa laga codsan doonaa inay yimaadaan. Waxaa lagaa codsan doonaa inaad sharaxdo walaacyadaada.
- Kormeeraha ama madaxa qeybta ayaa sharxi doona go'aanada ama talaabooyinka laga qaaday kiiska iyo sababta loo qaaday.
- Koox ahaan, waxaan ka shaqeyn doonnaa dejinta qorshe lagu xaliyo tabashooyinkaaga.
- CSO waxay kuu soo diri karaan warqad kuu sharraxaysa waxaad ka welwelsan tahay iyo tallaabooyinka ay hay'addu qaadi doonto ama qaadi doonin.

Haddii kiiskan ay ku lug leedahay maxkamadda, wakaaladda waxay u baahan kartaa oggolaanshaha Maxkamadda si ay u sameyso wixii isbeddel ah.

Majiraan xulashooyin kale oo aan ku xaliyo dhibaatooyinka?

Waaxda Adeegyada Shaqada iyo Qoyska ee Ohio waxay hubisaa in dhammaan hay'adaha adeegyada carruurta ee dawladu ay raacaan qawaaniinta gobolka. Haddii aad rabto inaad la xiriirto Waaxda Shaqada iyo Adeegyada Qoyska ee Ohio sabab kasta ha noqotee, waxaad wici kartaa Khadka Caawinta Macaamiisha lambarkan:

Waaxda Shaqada iyo Adeegyada Qoyska ee Ohio

Wicitaan Bilaash ah: 1-866-635-3748, Xulashada 2, Kordhinta 3

Haddii aad rumeysan tahay in lagugu bartilmaameedsaday takoor xagga da'da, jinsiga, dhalashada waddanka ah, jinsiyadda, midabka, diinta ama naafonimada, la xiriir:

- Waaxda Shaqada iyo Adeegyada Qoyska ee ismamul hoosaadka Hamilton
  (513) 946-4704

ama

- Waaxda Ohio ee Adeegyada Shaqada iyo Qoyska, Xafiiska Xuquuqda Madaniga

  State Office Tower, Dabaqa 18aad

  150East GayStreet

  Columbus,Ohio 43215

ama

- Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Mareykanka ee Xuquuqda Madaniga, Gobolka V
  233 North Michigan Ave., Suite 700
  Chicago, Illinois 60601

Isgaarsiinta Nidaamkan Cabashada ee Shaqsiyaadka aan Ingiriisiga sifiican ufahmayn ama Maqalka ama Aragga naafo ka ah.

Haddii aad ku xaddidantahay aqoonta Ingiriisiga, HCJFS waxay ku siin doontaa turjubaan xirfad leh oo aqoon leh. Haddii aad wax maqasho ama aragga naafo ka ahaato, HCJFS waxay sameyn doontaa waafajin habboon si loo hubiyo in nidaamkan dib loo eego lagaala hadlo adiga iyo in su'aalahaaga looga jawaabo si aad ugu qanacsan tahay.